

The Schools St. Paul Ardeydu way u qalmaan

Waa maxay sbabta ay bareyaashu diyaar ugu yihiin inay shaqo joojin ugu sameeyaan iyaga dartood

Waa maxay waxa ay bareyaashu ugu dagaallamaan inay helaan qandaraas laga galo wada-hadal gorgortan ah?

Ahmiyadaha ugu sarreeya ee Federaashinka Barayaasha Saint Paul waxaa ka mid ah:

- Xajmiga fasallada yaryar si ay ardayda ugu suurtagasho inay si shakhsi ahaaneed diiradda u saaraan waxbarashada. Hadda ardaydu si ka weyn sidii waqtigii lagu jiray cudurka safmarka ardeydu waxay u baahan yihiin feejignaan dheeraad ah.
- Kordhinta shaqaalaynta kooxaha caafimaadka dhimirka ee dugsi kasta. Dugsiyadeenu waxay la kulmaayaan dhibaatooyin caafimaad oo khuseeya dhinaca maskaxda waxayna si gaar ah ugu baahan yihiin cilmi-nafsi yaqaanno badan, khabiiri faragelineed iyo shaqaale bulsho.
- Dad badan oo qaan-gaar ah kuwaasoo la shaqeeya ardaydeena qaba baahiyaha gaarka ah si ay u siiyaan taageero dheeraad ah oo fool ka fool ah.
- Mushahar cadaalad ah oo macquul ah oo la xiriira qiimaha-nololeed ee barayaashayada, gaar ahaan kaaliyayaashayada waxbarashada iyo shaqaalaha qaabbilsan taageerada, si ay ugu sii jiraan xirfadda.

Wax badan ka baro talooyinka lasoo jeedniayo adigoo ka tixraacaya ciwaanka hoose www.spfe28.org/bargaining/the-time-is-now.

Maxaynu mar kale halkan u nimid? Miyey jiri doontaa shaqo joojin kale?

Labadii sano ee lasoo dhaafay waxay ina tuseen ardaydu inay u baahan yihiin taageero dheeraad ah.. Nasiib darro, hogaamiyayaasha SPPS kama aysan dhaqaaqin gorgortanka wada-hadalada oo xitaa waxay rabaan inay dib uga noqdaan maalgelinta ardaydeenu u baahan yihiin.

Wada xaajoodyada qandaraasyada, oo dhaca labadii sanaba sida lku qeexan sharciga gobolka, ayaa bilaabmay bishii May ee lasoo dhaafay. Ururku wuxuu soo jeediyay 23 soo-jeedin intii lagu jiray afar kulan oo dadwayne kahor intaanay SPPS soo gudbin dalabka dhexdhexaadinta bishii Noofambar. Dhexdhexaadintu waxay socotay ilaa Disembar.

Qofna ma rabo inuu shaqada joojiyo. Laakin hadii degmadu dhaqaaqi waydo, hurida shaqo joojinta muddada-gaaban waa mid qaayo weyn leh si ardaydeenu u helaan faa'iidooyinka muddada fog ee ay dugsiyadu u qalmaan sanadaha soo socda.

Degmadu ma awoodi kartaa?

Lacag waa la helayaa. Maadaama in ka badan \$300 milyan ay heli karto maaliyadda federaalku, degmadu waxay bilaabi kartaa inay maalgeliso waxyaabaha ay waalidiinta iyo ardaydu rabaan iyo waxay u baahan yihiin – barayaashuna way yaqaaniin inay shaqeeyaan.

Saraakiisha SPPS waxay sameeyaan saadaal maaliyadeed oo xun sannad kasta, laakiin waxay ku dhameeyaan lacag dheeraad ah oo ay ku daraan lacagta sanduuqa maalinta roobka ee degmada. Sannadkii hore, degmadu waxay miisaaniyada u qoondaysay \$33 milyan oo khasaare ah kaliya si ay sannadka ugu dhammaato \$22 milyan oo dheeraad ah.

Miisaaniyaduhu waxay ka tarjumayaan mudnaanaha. Hogaamiyayaasha degmadu waa inay bilaabaan inay ka dhageystaan khubarada – waalidiinta iyo barayaasha – waxyaabaha ardaydeenu u baahan yihiin.



SAINT PAUL FEDERATION
OF EDUCATORS LOCAL 28

Goorma ayay shaqo joojinta bilaaban doontaa?

Taariikhda shaqo joojinta ayaa loo qoondeeyay 8-da Maarso haddii barayaashu aysan heli karin ballanqaadyada saxda ah ee degmada.

Haddii ay shaqo joojin dhacdo, maxay taasi uga dhigan tahay ardayda iyo qoysaska St. Paul?

Dugsiga Degmada wuxuu gaari doonaa go'aan, laakiin waxay u badan tahay inay xiri doonaan dugsiyada inta lagu gudajiro shaqo-joojinta. Waalidiintu waxay u baahan doonaan inay ardaydooda u helaan xulashooyin kale.

Waxaan heli doonaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan daryeelka ilmaha, doorashooyinka la xiriira dhinaca cuntada iyo agabyada kale ee qoysaska kuwaasoo laga heli karo barteena internetka ee u dhow shaqo joojinta.

Degmadu miyay ku dari doontaa maalmo dugsiiyeed dheeri ah haddii shaqo-joojin dhacdo?

Khasab maaha. Haddii degmadu hoos uga dhacdo tirada ugu yar ee maalmaha ee ardayda dugsiga dhexe iyo dugsiga sare loo baahan yahay inay ku jiraan dugsiga, degmadu waxay ku dari kartaa maalmo. Laakiin wax ganaax ah ma jiro marka la eego sida uu dhigayo sharciga gobolka haddii degmadu aysan buuxin shuruudahaas.

Sidee waalidiinta, ardayda iyo xubnaha bulshadu gacan uga geysan karaan in heshiiska la xalliyo?

Waxaa jira siyaabo badan oo aad ku ogaan karto oo aad ka caawin karto SPFE inay hesho qandaraas maalgeliya ardayda isla mar ahaantaana sharfaya barayaasha!

- Saxeex [codsigayaga](#) si aad u hesho liiskii ugu danbeeyey ee gaashaanbuurta bulshada deegaanka .
- Nagala soco [Facebook](#) iyo [Twitter](#). Kadib kasoo jawaab-celi tweeterka, like-garee oo la wadaag qoraaladayada
- U qor [wargad ku socota Joe Gothard](#) oo u sheeg inay tahay waqtigii la maalgelin lahaa ardayda iyo barayaasha isla mar ahaantaana laga fogaan lahaa shaqo joojinta!

Waxaan sii wadi doonaa inaan soo dhejino wararka iyo siyaabaha lagu taageerayo barayaasha iyo qoysaska mareegahayaga.